

Ogaysiis kusaabsan Dhicitaanka U qalmida Da'da Afar (4) Notification of Age Four (4) Eligibility Expiration

MAGACA IYO CINWAANKA MACMIILKA

MAGACA IYO CINWAANKA WAKIILKA MACMIILKA

JAWAAB CELIN: OGAYSIIS KUSAABSAN DHICITAANKA U QALMIDA DA'DA AFAR (4)

Ilmahaaga hadda wuxuu macmiil kayahay Maamulka Horumarinta Naafooyinka (DDA). Asaga/ayada waxaa dhici karta in uu noqdo mid u qalma Maamulka Horumarinta Naafooyinka sabab u ah isqorideeda/isqoridiisa lagu qoro barnaamijka seddex-illaa-dhallashada ama Barnaamijka Xoog saarida Caafimaadka Caruurta. U qalmida ilmahaaga uu u qalmo Maamulka Horumarinta Naafooyinka waxay dhaceysaa dhallashadiisa/ dhallashadeeda afaraad. Si uu ilmahaaga u ahaado mid u qalma Maamulka Horumarinta Naafooyinka, waxaa khasab kugu ah in aad dib u codsatid kahor inta uusan ilmahaaga noqon afar jir. Ilmahaaga waxaa khasab ah in uu ahaado u qalmida dib-u xadidida sabab u ah mid kamid ah shuruudaha lagu qorey Jadwalka Dukumeentiga Loo baahanyahay, midkaas oo lasoo lifaaqey.

Sidee dib loogu codsanayaa:

Laxiriir shaqaalaha U qalmida iyo Qaadashada Maamulka Horumarinta Naafooyinka ugu yaraan 90 maalmood oo kahoreysa dhallashada afaraad ee ilmahaaga si aad u codsatid baakada ama xirmada dib-u codsashada. Middaana waxaad kusamayn kartaa qaab qoraal ah ama adiga oo waca lambarka teleefoonka hoos kuqoran. Baakada ama xirmada codsiga ayaa lagu soo diri doonaa. Sidoo kale waxaad kuheli kartaa dukumeentiyada codsiga tooska internatka adiga oo soo booqda boggaan internatka <https://www.dshs.wa.gov/dda/consumers-and-families/eligibility>.

Maxaa dhacaya haddii Aanan dib u codsan?

Haddii aadan codsan xirmada ama baakada dib-u codsashada ama haddii aadan dib usoo celin codsiga ugu yaraan 60 maalmood oo kahoreysa u qalmida ilmahaaga uu u qalmo Maamulka Horumarinta Naafooyinka wuxuu ahaan doonaa mid dhaca marka ay tahay dhallashadeeda/dhallashadiisa afaraad. Haddii uu ilmahaaga kaqaato adeeg lacag ah Maamulka Horumarinta Naafooyinka, adeegaan wuxuu dhammaan doonaa marka ay tahay dhallashadeeda/dhallashadiisa afaraad.

Dhicitaanka ay dhacdo u qalmida Maamulka Horumarinta Naafooyinka ma ahaan doonto mid saameysa kaqayb qaadashada barnaamijyada Waxbarasho ee Khaaska ah ama u qalmida SSI. Sidoo kale ma ahaan doonto mid saameysa adeeg kasta oo aad kaqaadato Waaxda Adeegaha Bulshada iyo Caafimaadka, sida gargaarka Caafimaadka, TANF ama gargaarada cuntada.

Fadlan uga soo jawaab sida ugu dhakhsiyaha baddan ee ugu suurtoogalka ah, laakiin muddo aan kayarayn 90 maalmood oo kahoreysa dhallashada afaraad ee ilmahaaga. Haddii aynaan wax war ah ama jawaab ah kaa hellin, waxaan u qaadanaynaa in aadan doonaynin in aad sii wadid kujirida ilmahaaga uu kujiro u qalmida Maamulka Horumarinta Naafooyinka. Ayada oo aan jirin dukumeentiga saxda ah ee loogu talagalay shuruuda u qalmida da'da afaraad (4) u qalmida ilmahaaga ugu jiro Maamulka Horumarinta Naafooyinka iyo adeegaha Maamulka Horumarinta Naafooyinka waxay dhici doonaan marka ay tahay dhallashadeeda/dhallashadiisa afaraad (4^{aad}).

Haddii aad qabtid su'aalooyin ama aad jeceshahay in aad codsatid baakada ama xirmo, fadlan laxiriir

MAGACA

LAMBARKA TELEEFONKA

CINWAANKA BOOSTADA

Nuqul kusaabsan qaanuunada gobolka xukumaya u qalmida ayaa waxaa lagu helayaa haddii lacodsado ama sitoos ahba boggaan internatka <https://www.dshs.wa.gov/dda/consumers-and-families/eligibility>.

cc: Faylka macmiilka

Jadwalka Dukumeentiga Loobaahanyahay

| XAALADA NAAFADA | DA'DA | OGAANSHAHA CUDURKA | QOFKA KHABIIRKA KU AH OGAANSHAHA CUDURKA | DIWAANO KALE |
|---|-----------------------|---|--|---|
| Dib u dhac Horumarka ama Koritaanka ah | Da'da 4 illaa 9 | Dib u dhac Horumarka ama Koritaanka ah | Xiradlaha u qalma in uu maamulo qiimeynta horumarinta ama baaritaanada | Da'da 4 tooska 9 – Seddex ama kabaddan oo dib u dhacyo ah -1.5 SD ama 25 % oo taariikh ahaan da'da ah ee kusalaysan qiimeyn hadda ah oo ah gudaha 12 kii bilood ee lasoo dhaafay. |
| Caafimaad ahaan Khaas ah | Dhallashada tooska 17 | | | U qalma Barnaamijka Caafimaadka Caruurta Khaaska ah. |
| Naafada Caqliga | Da'da 4 iyo kaweyn | Naafada Caqliga ah (Dib u dhac Maskaxeed hore) | Khabiir kutakhasusey Cilmi nafsiga, Dugsiga Washington ee Cilmi nafsiga Loogu kalsoonyahay ama dugsi kale oo cilmi nafsi ahaan loogu kalsoonyahay ee ka ahaaday dhinaca Ururka Caalamiga ah. ee Dugsiga Takhasusayaasha Cilmi nafsiga | Warbixin buuxda oo Cilmi nafsi ah oo ay kujirto Jadwal dhibco buuxa oo Qiyaasta Caqliga ah (IQ) oo ah wax kabaddan labbo heer oo weecsan oo kahooseeya ujeeddada, iyo dhibco baaritaan oo laqabsashada xirfadaha ah oo ah wax kabaddan labbo heer weecsaanaan oo kahooseeya ujeeddada. |
| Suuxid Maskaxda ah | Da'da 4 iyo kaweyn | Suuxid Maskaxda ah Qalal bawdada ah Qalal dhinaca ah Qalal labbada dhinac jirka ah | Dhakhtar Shahaadaysan | Biloowga kahor muddada da'da 3, iyo macluumaad taageeraysa ama xoojinaysa baahida loo baahanyahay caawimaad jir jooqto ah oo toos ah oo labbo ama waxkabaddan meelood ah (musqul gayn, u qubeyn, cunto siin, u labisid, dhaqaajin, ama xiriir ah). |
| Qalal | Da'da 4 iyo kaweyn | Qalal ama Xanuun suuxdin | Dhakhtar Neerfaha Shahaado kahaysta Guddiga | Ogaanshaha cudurka kusalaysan taariikhda caafimaad iyo baaritaan neerfaha ah, xaqiijin ka ahaatay dhakhtar ama dhakhtar neerfaha ah oo kusaabsan suuxitaanka aan laxakamayn karin oona iska socota ama soo noq-noqota, iyo baaritaan kusaabsan laqabsashada xirfadaha oo tusinaya xadidaado hoose ee laqabsashada ah oo kushaqaynta wax kabaddan labbo heerka weecsaanaanta ah ee kahooseeya ujeeddada. |
| Ootisimka (DSM-IV kasta) | Da'da 4 iyo kaweyn | Ootisimka ama Xanuunka Ootisimka 299.00 kasta ee DSM-IV-TR | Dhakhtar cilmi nafsi oo shahaadaysan, Kalkaaliye Xirfadle oo Heer sare ah oo Diiwaangalsan (ARNP) xiriir la leh cudurka Ootisimka ama xarunta horumarinta ama Shahaado kahaysta Guddiga: Dhakhtar Neerfaha ah, Dhakhtar maskaxda ah, ama Dhakhtarka caruurta qaabilsan Habdhaqanka iyo Horumarinta | Qiimeyn buuxda oo ah midkasta oo DSM-IV ah midkaas oo buuxinaya dhammaan shuruudaha garashada cudurka, daliil dib u dhicid ama shaqeyn aan caadi ahayn oo kahoreysa da'da 3 ee ah ladhaqanka bulshada, luuqada, xirfadaha xiriirka ama riwaayad khayaali ama astaan ah, iyo baaritaan xirfadaha laqabsashada oo tusinaya xadidaad weyn oo kusaabsan laqabsashada shaqaynta ee ah wax kabaddan labbo heer oo weecsaanaan ah oo kahooseeya ujeeddada. |
| Xanuunka Itaaldarada Ootisimka (DSM-V kasta) | Da'da 4 iyo kaweyn | Xanuunka Itaaldarada Ootisimka 299.00 DSM-V kasta ee ay kujirto heerar daran oo ah 2 ama 3 oo kujira labadda khaanadood | Dhakhtar cilmi nafsi oo shahaadaysan, Kalkaaliye Xirfadle oo Heer sare ah oo Diiwaangalsan (ARNP) xiriir la leh cudurka Ootisimka ama xarunta horumarinta ama Shahaado kahaysta Guddiga: Dhakhtar Neerfaha ah, Dhakhtar maskaxda ah, ama Dhakhtarka caruurta qaabilsan Habdhaqanka iyo Horumarinta | Qiimeyn buuxda oo ah midkasta oo DSM-V ah midkaas oo buuxinaya dhammaan shuruudaha garashada cudurka, daliil dib u dhicid ama shaqeyn aan caadi ahayn oo kahoreysa da'da 3 ee ah ladhaqanka bulshada, luuqada, xirfadaha xiriirka ama riwaayad khayaali ama astaan ah, baaritaan xirfadaha laqabsashada oo tusinaya xadidaad weyn oo kusaabsan laqabsashada shaqaynta ee ah wax kabaddan labbo heer oo weecsaanaan ah, iyo Heerka Shaqaynta Caqliga FSIQ oo ah hal heer oo weecsaanaan ah ama inbaddan kahooseeya ujeeddada – ama – buuxiya dhammaan shuruuda loogu talagalay Xanuunka Ootisimka 299.00 ee ah DSM-IV.kasta. |
| Midkale oo xanuun Neerfayaasha ah ama Xaalad Kale oo Lamid ah Naafonimada Caqliga | Da'da 4 iyo kaweyn | Xanuun hiddo wadayaalka ama Neerfaha ah oo lagu yaqaano in uu sababo hoos u dhicid iyo daciifnimo xirfadaha laqabsashada iyo caqliga ah | Dhakhtar Shahaadaysan | Jadwal dhibco buuxa oo Qiyaasta Caqliga ah (IQ) oo ah wax kabaddan 1.5 oo ah heerka weecsan ee kahooseeya ujeeddada, iyo baaritaan laqabsashada xirfadaha ah oo tusinaya xadidaad weyn oo shaqaynta laqabsashada ah oo ah wax kabaddan labbo heer weecsaanaan oo kahooseeya ujeeddada. |

Fiiro gaar ah: Foomkaan waa keliya mid hagid guud ah Maamulka Horumarinta Nafooyinkana wuxuu u baahnaan karaa macluumaad dheeri ah ama qiimeyn. Dukumeentigaan waa tallaabada koowaad ee xadidaada u qalmida. U qalmida Maamulka Horumarinta Nafooyinka waxaa lagu xadidaa WAC Bogg kasta oo ah 388-823.